

# Nagu saabsan

## Soo dhowow!

Waaxda Beeraha Nasashada, Madadaalada iyo Biyo Mareenka (Department of Parks, Recreation and Waterfront) waxay kormeertaa dhammaan 35+ Beeraha Nasashood, 550+ Ekar oo Dhul Bannaan ah, 4 Xeebood oo Dadweyne, Geedaha & Cagaarka Wadooyinka, Beeraha Nasashada ee Bulshada, 3 Dhul Xabaalood, Miller Recreation Center, Leddy Ice Arena, Champlain Senior Center, North Beach Campground, Guryaha Qubayska ee Marina iyo dhammaan Barnaamijyada Madadaalada ee Burlington.

## Bayaanka Hadafka

Si la isugu xiro goobaha dadweyne ee kala duwan oo beddel-beddelma iyo barnaamijada kobaca, dhiirigelinta leh isla markaana abuura is-dhexgal bulsho oo loo wada dhan yahay iyada oo loo marayo dhulka, biyaha iyo dadka.

## Hadafka Kobaca Kala duwanaanta iyo Sinnaanta

Deegaan taageero iyo wax dhis (shaqo) leh oo soo dhawaynaysa sinnaanta iyada oo loo marayo go'aan-qaadasho loo wada dhan yahay iyo ficillo laga fikiray oo maalinle ah.

## Qiyamyada Waaxda

**Gelitaanka/Helitaanka** – Waxey xoogga saaraysa mabaadi'da naqshadeynta caalamiga ah iyo xasaasiyada maaliyadeed ee dhammaan khibradaha.

**Daacadnimo** – Kalsooni kasbashada ka dhalata shaqada aan ka qabano gudaha goobaha dadweynaha.

**Ku-tiirsanaan** – Adeeg macaamiil oo jawaab celin leh isla markaana diirada saaraya dadka.

**Caafimaadka & Badqabka** – Diirad saarida hab-nololeedyada firfircoon, caafimaadka qaba isla markaana dheelitiran.

**Shaqo-kooxeedka/ Iskaashiga** – Waxaa naga go'an inaan iskaashiga iyo wadashaqeyn u muujino bulshadayada iyo asxaabtayda aan shaqada wadaagno.

**U wado-dhanaansho** – Kobicinta dhaqamada dadka noocyadiisa kala duwan.

**Ilaalinta** – Adeegyada dadweynaha iyo deegaan waara.

**Tayada** – Dhammaan waxyaabaha aan qabano.

Siyaasadda Takoor La'aanta ee Magaalada oo Dhan ah: The City of Burlington (Maamulka Magaalada Burlington) uma dulqaadan doono dhibaataynta sharci darrada ah ama takoorka ku salaysan siyaasad ama diin, isir, midab, asal qaran, goobta dhalashada, abtirsiiinta, da'da, jinsiga, nooca galmada, aqoonsiga jinsiga, heerka guurka, heerka halyeeynimada, naafonimada , Xaaladda HIV-ga, heerka dhibbanaha dembiyeed ama macluumaadka hidda-sidaha. The City (Maamulka Magaalada) waxaa sidoo kale ka go'an inay bixiyaan adeegyo, tas-hiilaad, iyo fursado shaqo. Si aad u hesho macluumaadka helitaanka waxyaabahaas ama macluumaadka oo u qoran qaab kale, fadlan Waaxda Illaha/Macluumadka Dadweynaha/Maamulka Shaqada iyo Shaqaalahaa kala xiriir (802) 540-2505.

## Rules and Regulations (Xeerarka iyo Qaanuunada) ka jira Beeraha Nasashooyinka

Goob kasta waxaa laga yaabaa inay leedahay sharciyo gaar u ah, sidaas darteed fadlan eeg sharciyada lasoo dhajiyay ee aaggaas. Qaar ka mid ah xeerarka guud ayaa hoos ku taxan. **Faahfaahin dhamaystiran fadlan guji [halkaan](#)** si aad u hesho **dhammaan City Ordinances of Burlington (Xeerarka Magaalada Burlington)**.

### Dhaqanka/Anshaxa Greenway

- **Joogteey xawaare badbaado leh.** Si tartiib ah ugu soco meelaha ciriiriga ah. Wuxaan ognahay in Jidku uu xoogaa ciriiri ka noqon karo meelaha qaar.
- **Baaskiilada waa in ay waddo siiyaan dadka lugeynaya.** Dadka lugeynaya waxay xaq u leeyihiin inay mar walba wadada maraan, dhammaan dadka wada baaskiilada iyo qaababka kale ee gaadiidka waa inay had iyo jeer isticmaalaan taxaddar marka ay u dhow yihiin meelaha ay dadka lugta ku maraan.
- **Baaskiilayda waa in ay raacaan hal wado.** Wadaagistu waa daryeel, habka ugu wanaagsan ee wadada lagula wadaagi karo dadka lugeynaya waa in la

joogteeyo hal layn oo keliya! Haddii aad u baahan tahay inaad dhaafsto gaari kale iska hubi in ay ammaan tahay marka hore. Waxay la mid tahay sidii adigoo haya waddo hal haad ah, waa inaad ka gudubtaa oo keliya khadka dhexe markaad ogaato inay ammaan tahay.

- **Dadka baaskiilka wata waa in ay digniin siiyaan dadka kale marka ay gudbayaan.** Inaad dhahdo “passing on the left” (“waxaan ka gudbayaa dhanka bidixdaada”) iyo inaad garaacdo gambaleelkaaga, haddii aad mid leedahay, ayaa ah hababka ugu fiican. Tani waxay u ogolaanaysaa dadka kaa horreeya inay ogaadaan waxaad samaynayso sababtoo ah dadka lugaynaya iyo inta badan baaskiilayda ma haystaan muraayadaha haadka ah.
- **U hogaansan astaamaha taraafikada** Baaskiilayda waa inay adeecaan nalalka taraafingga iyo astaamaha sida astaanta joogsiga, wado siinta, iyo isgoosyada dadka lugaynaya. Tani waxay ilaalinaysaa badbaadada qof walba iyo inay dadku isku macluumaad ka haystaan fahamka ku aadan xaquuqda wadada.
- **Dadka lugeysiinaya eeyayaasha waa inay eyga ku xiraan xarig gaaban oo ayna ka ilaaliyaan wadada ay isticmaalaan baaskiilayda iyo isticmaalayaasha kale ee Wadada.** **Xusuusnow inaad qaado saxarada eygaaga.** Qaadista saxarada eyga waxay gacan ka geysanaysaa nadaafada Jidka Cagaaran iyo Harada.
- **Ahaw mid nabdoon markaad wax wadayso.** Xiro koofiyadda iyo qalabyada ka hortagga shilka marka aad wadayso baaskiil ama mooto. Istimaal nalalka baaskiilka markaad wadayso habeenkii.

## Fadlan daryeel beeraha nasashooyinkaga

- Haka gurin wax ubaxyo, miro ama caleen ah, ama ha jarjarin ama ha dhaawacin dhirta ama dhismayaasha ku yaala mid ka mid ah jardiinooyinka magaalada.
- Ha daadin qashin
- Ha keenin dhalooyin quraarad ah beeraha nasashada (marka laga reebo markaad ku kaambeynayso North Beach)
- Meel kasta ha iskaga kaambigareeynin, marka laga reebo North Beach Campground
- Ha shidin wax gubmaya/holac keenaya
- Wax hub ah ha soo gelinin beeraha nasashada
- Ha shidin dab furan (Xeeraka ka jira magaalada ma ogola dab furan in la shito nooc kasta ha ahaadee)
- Ha u ogolaan eeyaha inay iskood ugu orordaan gudaha beeraha nasashada, marka laga reebo meelaha loo qoondeeyay eeyada

- Sigaar haku cabin meelaha lagu ciyaaro, hoyga, xeebaha ama garoomada ciyaaraaha
- Wax ey ah ha keenin xeebaha dadweynaha ee ku yaala Oakledge Park, North Beach ama Leddy Beach

## Ogolaansho ayaa loo baahan karaa

Ogolaanshaha isticmaalka gaarka ah ee baarkinka ayaa loo baahan yahay haddii mid ama in ka badan oo ka mid ah shuruudahan ay jiraan

- Koox ka kooban labaatan (20) ama in ka badan oo qofood ay rabaan inay isticmaalaan aagga beerta nasashada ama xarunta
- Boos ka qabsashada iyo isticmaalka gaarka ah ee aagga beerta ama xarunta ilaa wakhti xaddidan iyo taariikh gaar ah ama si joogto ah oo qorshaysan
- Iisticmaalka aagga beerta nasashada ama xarunta ee loo isticmaalayo munaasabad u furan dadweynaha
- Iisticmaalka aagga beerta nasashada ama xarunta ee loo isticmaalayo ujeedooyin ganacsi ama lacag uruurineed
- Tartamada ama dhacdooyinka ciyaaraaha halkaas oo shaqsyaadka ama kooxaha lagu soo dalacayo lacag si ay uga qayb qaataan ama ugu daawasho tagaan
- Iisticmaalka aagga beerta nasashada ee loo isticmaalayo madadaalo halkaas oo deeq bixin ama khidmad laga yaabo in lagaaga codsado

## Eeyaha ku jira Beeraha Nasashada iyo Xeebaha

- Eeyaha waa laga ogol yahay beeraha nasashooyinkaga iyo meelaha dadweynaha, laakiin **waa inay xarig ku xirnaadaan**
- Eeyada looma ogola xeebahayada dabaasha ee dadweynaha (Oakledge/Blanchard, Leddy, North Beach)
- **Wax ka ogow meelaha aad u kaxaysan karto eeygaada.**

## Xeerarka Beeraha Nasashada ee Eeyda

Furan Aroortii ilaa Makhribka

Xeerarka Aadanaha:

- Ku raaxayso wakhtiga aad ku qaadanayso beerta eyda. Qof kasta u muuji ixtiraam oo deris wanaagsan noqo.

- Adiga ayaa mas'uul ka ah eygaaga(ey-yaashada)
- Gacan ka gayso nadiifinta aaggan oo qaad saxarada eygaaga. Wixii qashin ah ku rid weelka qashinka oo meelaha haku tuurin.
- Dhammaan ey-yaasha, iyo carruurta ka yar 12 sano, waa in ay la socdaan qof weyn oo 18 jir ah ama ka weyn.
- Waxaa qofkiiba loo oggolyahay saddex (3) ey.
- Way fiicantahay in eygaagu si muuqata u haysto shati isla markaana u ahaado mid talaashan si waafaqsan sharciga.
- Goobtan waxaa loogu talagalay jimicsiga eyda oo keliya.
- Fadlan guriga uga soo tag cuntada iyo waxyaabaha lagu quudiyo eyda.
- Eeyada waa inay ahaadaan kuwo lagu xakamayn karo codka. Fadlan gacanta ku hay xariga uu ku xiran yahay eyga mar kasta.
- Fadlan ha u ogolaan eeyaha inay qodaan dhulka, marka laga reebo haddii ay goobtaas tahay meesha eeyada loogu talagalay. Buuxi godad kasta oo eyga uu qodey.
- Eeyada waaweyn looma oggola aagga loogu talagalay eeyada yaryar.
- Eeyaha xanaaqa/gardarrada badan ama eeyaha dheddigga ah ee kulayl lama oggola.
- Lama oggola in sigaar lagu cabu beerta nasashada.
- DHAMMAAN qaniinyada eyda waa in si degdeg ah loogu wargaliyaa Waaxda Booliska Burlington: (802) 658-2704. Wicitaanka Gurmadka 911.

Xeerarka Eyda:

- Fadlan xaddid qaylida eyga. Qoditaan lama oggola. Si fiican u cayaar. Woof!

## **Beerta lagu iskayt gareeyo**

Furan Aroortii ilaa Makhribka

XEERARKA:

- Iskayt gareynta, baaskiil-wadista iyo ku iskayt gareynta laynka tooska ah wuxuu keeni karaa dhaawac halis ah: lafaha in jabaan, curyaannimo, dhaawac maskaxeed ama xitaa dhimasho. Isticmaal iskaytka adigoo og halista ka dhalan karta.
- Gacan ka geyso ilaalinta oogada; Mootooyinka lugaha lagu wado iyo BMX-yada waa in ay lahaadaan cidhifyada biraha ah oo baaskiiladuna waxay u baahan yihiin inay lahaadaan biinanka caaga ah ama inaysan lahaanin biinan gebi ahaanba.

Koofiyadaha, suufka jilibka, suufka sxullada iyo curcurka ayaa si adag loogu talinaya.

- Iskaytka garee ilaa inta kartidaada ah.
- Waalidiinta iyo dadka ardayda masuulka ka ah ayaa mas'uul ka ah badbaadada caruurtooda iyo xaqijinta in caruurtoodu u hogaansamaan sharciyada beerta nasashada.
- Lama oggola baabuurga matoorka leh.
- Gacan ka geysa goobaha iskaytka loogu talagalay inay ahaadaan kuwo nadiif ah oo ha wasakhayn! Iisticmaal weelasha qashinka oo ha tuurtuurin qashinka.
- U muuji ixtiraam saaxiibbadaada kula isticmaalaya iskaytarka iyo dadka daawanaya. Lama oggola hanjabaad, aflagaado ama hadal meel ka dhac ah.
- Jidatka gaarka ah, biraha ama qalabyada kale ee shakhsiyeed waa mamnuuc.
- Haddii goobaha lagu isticmaalayo iskaytarka ay qoyan yihiin, baraf leeyihiin ama ay baraf ku daboolan yihiin, ama haddii ay jiro qashin ama caqabado kale oo oogada saaran, ha isticmaali iskaytka.
- BAASHAAL! Badbaado ku joog.

## **Duulinta Darooniska Marka La Joogo Goobaha Nasashooyinkeena? Halkaan waxaa ku qoran waxaad u baahan tahay inaad ogaato:**

Shuruucdan waxaa amray FAA. Ma bixinno ogolaanshaha ah in daroonis lagu dhex duuliyo jardiinooyinkeena.

1. **Diiwaangeli darooniskaaga, dhankeeda kore ku calaamadeey lambarka diiwaangelinta** (PDF), oo hore u soo qaado caddaynta diiwaangelinta.
2. Darooniska waxaad keliyoo u isticmaashaa ujeeddooyin madadaalo.
3. Raac tilmaamaha badbaadada ee ururka ku salaysan bulshada.
4. **Ku duuli darooniskaaga 400 fiit ama wax ka hooseeya marka aad ku jirto hawada sare ee “Class G” ama aag aan la xakamayn.** Taasi waa hawada aanan xakamayn FAA. Si aad u ogaato nooca hawada aad ku jirto, tixraac ku sameey ablikeeshinka mobaylkaaga ee aad ku hagayso darooniska (haddii uu kuugu jiro) iyo/ama isticmaal ablikeeshinada kale ee mobaylada ee la xiriira isticmaalka darooniska. Ogaanshaha goobtaada iyo hawada aad ku jirto waxay sidoo kale kaa caawin doontaa inaad iska ilaalso faragelinta diyaaradaha kale.
5. **Ha ku duulin hawada la kontoroolo (agagaarka iyo korka garoomo diyaaradeed badan) marka laga reebo haddii:**
  1. Aad hesho ogolaanshaha hawada ee ka hawlgalka hawada la kantaroolo adigoo u maraya LAANC ([Low Altitude Authorization and Notification](#)

**Capability - Oggolaanshaha Cabirka Hooseeya iyo Awooda Ogeysiinta**), kahor intaadan duulinin. Wax badan ka baro **Bixiyeyaasha Adeegga LAANC UAS ee la ansixiyay** waraaqaha madadaalada.

2. Wuxaad ku duulaysaa goob go'an oo xamasad leh oo heshiis qoraal ah la leh FAA. **FAA waxay soo dhejisay liiska goobaha la ansixiyay** (MS Excel) oo **wxayna ku muujisay dhibco buluug ah xagga khariidadda**. Goob kasta oo go'an waxay ku xaddidan tahay joogga/dhererka ka muuqda khariidadan, taasoo ku kala duwan goobaha.

**OGSOONOW:** Haddii ururkaagu uu xiisaynayo in uu sameeyo warqad heshiis ah oo loogu talagalay goob duullimaadeed jaango'an, fadlan nagala soo xiriir [9-AJT-UAS-Integration@faa.gov](mailto:9-AJT-UAS-Integration@faa.gov).

**OGSOONOW:** *Dhammaan beeraha nasashada ee BPRW waxay ku yaalaan hawo la maamulo marka laga reebo Beerta Nasashada ee Starr Farm.*

6. **Darooniskaaga ku wad meel aad ka arki karto**, ama meel uu ka arki karo qof kuu eegaya kaas oo jooga goobta ama kula xiriiraya.
7. Ha ku duulin hawada sare ee duulimaadku ka mamnuuc yahay. Xakamaynta hawada sare waxa laga heli karaa **khariiradeena**, oo xaddidaadyada kumeelgaarka ah ee duulimaadyada waxaa laga heli karaa **halkaan**. Duuliyeysaasha darooniska ayaa mas'uul ka ah xaqiijinta inay u hoggaansamaan dhammaan xayiraadaha hawada.
8. Waligaa haku ag duulin diyaarado kale, gaar ahaan meel u dhow garoomada.
9. Weligaa ha kor duulinin kooxo dad ah, xafladaha dadweynaha, ama garoommada ay dad ka buuxaan.
10. Weligaa ha ku ag duulinin meel ay ka dhacday xaalad degdeg ah sida nooc kasta oo ka mid ah jawaab-celinta shilalka, hawlaha fulinta sharciga, dab-damiska, ama dadaallada soo kabashada duufaannada.
11. Weligaa ha duulinin adigoo isticmaalaya mukhaadaraad ama aalkolo.

Wadayaasha daroonada madadaalada waa inay ogaadaan in haddii ay si ula kac ah ugu xad gudbaan mid ka mid ah shuruudahan badbaadada, iyo/ama ay u duuliyaan darooniska si taxadar la'aan ah, waxaa lagu qaadi karaa ciqaab dembiyeed iyo/ama ciqaab madani ah.

# Ka Kireysashada Goobo gudaha Beeraha Nasashada & Xarumaha

## Ogolaanshooyinka Beeraha Nasashada (Park Permits)

Waa maxay sababta aan ugu baahanahay General Park Permit (Ogolaanshaha Guud ee Beerta Nasashada)?

Haddii aad raadinayso in aad kulan ka kooban 20 – 99 qof oo aan dadweynaha u furnayn ka qabsato mid ka mid ah beeraha nasashooyinka ee badan ee Burlington, waxaad u baahan doontaa ogolaansho! General Park Permit (Ogolaanshaha guud ee beerta) ma siinayso qofka isticmaalaha ah isticmaalka gaarka ah ee boosaska banaan loomana ogalaanayo codka sawaxanka sare leh noocuu doono ha ahaatee. Haddii aad rabto inaad si gaar ah u isticmaasho meel bannaan, codka la dheereeyay iyo/ama sawaxanka sare AMA uu isu imaatinkaagu ka badnaan doono 99 qof, fadlan hoos ka eeg macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qabsashada dhacdooyinka u baahan Special Use Permit (Ogolaanshaha Istimcaalka Gaarka ah).

Haddii aad rabto inaad codsato oggolaansho ama aad su'aalo qabto, fadlan wac (802) 865-7247.

**FADLAN OGOOW:** Haddii aad qabsanayso mid ka mid ah xarumahayna ama garoonnadayada si aad ugu qabsato kulan gaar ah, uma baahnid ogolaansho gaar ah oo isticmaalka guud beerta nasashada.

**Maxaan ugu baahanahay General Park Permit (Istimcaalka Ogolaanshaha Gaarka ah)?**

- Haddii aad raadinayso inaad ku qabsato kulan u furan dadweynaha.
- Haddii tirada dadka ka qaybgalaya kulanka gaarka ah ay ka badan tahay 99 qof.
- Haddii aad u baahan tahay inaad qabsato isticmaalka gaarka ah ee aagga beerta ama xarunta wakhti iyo taariikh gaar ah (tusaale ahaan dhacdo ka socota Battery ama Park Hall City).
- Haddii aad codsanayso inaad isticmaasho qalab codka dheereeyaa ama sawaxan sareeyaa leh.
- Haddii boos qabsashada loo qorsheeyay inay u dhacdo si joogto ah.
- Haddii isticmaalka aagga beerta nasashada ama xarunta loogu talagalay ujeeddooyin ganaci ama lacag ururineed.

- Haddi ka qeybgalka ama daawashada dhacdadu ay tahay lacag.
- Haddii codsi nooc kasta ah uu ka dhici doono dhacdada ama waxqabadka.

Dhammaan codsiyada Special Use Permit (Ogolaanshaha Iisticmaalka Gaarka ah) waxay u baahan yihiin oggolaanshaha Parks, Recreation and Waterfront Commission (Komishanka Beeraha Nasashada, Madadaalada iyo Biyo-mareenka) ugu yaraan hal bil kahor taariikhda la codsanayo in lagu qabto dhacdada. Waxay kulmaan Talaadada labaad ee bil kasta (marka laga reebo Luulyo) inkastoo aan khasab ahayn in qabanqaabiyeysa munaasabadaha ay ka soo qaybgalaan kulanka, aad ayaa loo dhiirigeliya. Si aad codsigaaga ugu keento Guddiga, waa inaad kala shaqeysaa Waaxda. Fadlan wac (802) 865-7247 haddii aad qabto wax su'aalo ah ama si aad u bilowdo hawshan.

Special Use Permits (Ogolaanshaha Iisticmaalka Gaarka) ah waxaa lagu bixiyaa si waafaqsan Lifaqa D ee Xeerka Xeerarka Maxaliga ah. Wuxaad Xeerka oo kaamil ah ka akhrisan kartaa halkan “Lifaqa D”:

<http://www.codepublishing.com/VT/Burlington/>

## Barnaamijyada Ka Jira Beeraha Nasashada

Haddii barnaamijyo ama/yo casharo bannaanka lagu qabanaayo aad rabto inaad ku qabato beerta nasashada Burlington, [Fadlan buuxi codsigan](mailto:Fadlan.buuxi.codsigan@burlingtonvt.gov) oo iimayl ugu dir [modaniel@burlingtonvt.gov](mailto:modaniel@burlingtonvt.gov). Fasalada 19 qofood ah ama ka yar ma laha kharash dheeraad ah ama ballan qabsasho. Fasalada 20 qofood ah ama ka badan, waxay raaci doonaan habraacyada ujrada “General Park Permit” iyadoo ku saleysan cabbirka waxaana loo baahan yahay in lala qorsheeyo Waaxda.

Fadlan wac (802) 865-7247 si aad u weydiiso wixii su'aalo ah!

## Picnic Shelters (Hoy-yaasha Ku Cunto wada-cunista) & Kireysiga Teendhooyinka

Xeebta quruxda badan ee Lake Champlain waxaa ku yaala 3 hoy oo la kiraysan karo oo ku kala yaala Oakledge (2), iyo North Beach (1) iyo 1 teendho la kireeyo oo ku taala Leddy Park. Waxay ku habboon yihiin inay martigeliyaan shirkarka yaryar sida xafladaha dhalashada, Cunto wada-cunista shirkadda, iyo isu imaatinka qoyska/asxaabta. Hoyga iyo teendhada waxaa la kiraysan karaa maalinta nuskeeda ama maalinta oo dhan waxayna diyaar u yihiin in la kirysto laga bilaabo bartamaha Meey ilaa bartamaha Sebtembar.

Hubi helitaankooda oo gudbiso codsigaaga kireysiga ee hoyga ama teendhada adigoo isticmaalaya halkan [si onlyn ah](#). Ama waxaad na soo wici kartaa (802) 865-7247 si aad boos uga qabsato mid ka mid ah meelahan. Fadlan ogow in saacadaha shaqada ay xadidan yihiin. Waxaan kuugu soo celin doonaa wicitaankaaga ama iimaylkaaga sida ugu dhakhsaha badan.

### Adeegyada

- Miisaska cunto kuwada cunista
- Qolalka musqulaha
- Birta lagu shiilo hilibka
- Ku baashaalida 9 mayl oo jidka baaskiilka ah
- Muuqaalka biyo mareenka
- Helitaanka xeebta dadweynaha

### Xeerarka & Qaanuunada

- Da'da ugu yar ee lagu kiraysto hoyga/teendhada waa 18 jir.
- Kaarka kiridhitka waa in la isticmaalo si loo qabsado boos celin (Visa, MC, AmEx, Discover).
- Xayawaanada rabaayadaysan qofkii wata waa la soo dhaweynayaa, iyadoo la raacayo shuruudahan soo socda: a) waa inay ku xirnaadaan xarig b) waa inaan laga tegin iyada oo aan la ilaalin c) mulkiilayaashu waa inay nadiifiyaan saxarada meel walbo ay joogaan iyo d) xayawaanka LOOMA ogola xeebta.
- Dhuxusha lama bixiyo; Birta hilibka lagu shiilo ee isticmaasho gaaska ayaa la keensan karaa goobta(yada).
- Khamriga waa la ogol yahay laakiin lama keeni karo kiish ama dhalo.
- Si habboon u tuur dhuxusha koolka ee kulul.

Sii-qabsiga hoyga waxa lagu qeexaa [Code of Ordinances \(Xeerka Sharciyada\)](#) ee the City of Burlington (Magaalada Burlington) Parks, Recreation and Waterfront Department (Xeerarka iyo Qaanuunada Waaxda Beeraha Nasashooyinka, Madadaalada, iyo Biyo-mareenka).

### Dhacdooyinka ka dhacaya Battery Park

Battery Park Band Shell waxaa aasaasiyan loogu talagalay bandhig faneedka, riwaayadaha, khudbadaha, bandhigyada, xafladaha madaniga ah iyo bandhigyada waxayna diyaar u yihiin in la kiraysto laga bilaabo Maayo ilaa bartamaha Oktoobar.

## Adeegyada

- Korontada
- Qolka musqulaha
- Muuqaalka Biyo mareenka

## Xeerarka & Qaanuunada

- Waa in uu jiraa 18 sano ama ka weyn si uu boos uga qabsado beerta.
- Oggolaanshaha Istimmaalka Gaarka ah(Special Use Permit) ee Beerta Nasashada ayaa loo baahan yahay si dhacdo nooc kastaba ha ahaatee loogu qabsado gudaha Battery Park. Fadlan eeg qeybta **Park Permit (Ogolaanshaha Beerta)** ee boggan si aad u hesho wixii macluumaa dheeraad ah.
- Dhawaaqa/sawaxanka sareeya ee gudaha beerta nasashada waa in aanu dhaafin 75 decibel waana in la sameeya keliya inta u dhaxaysa sacadaha 9 subaxnimo iyo 9pm. Waxa jira ugu badnaan 3 saacadood oo la ogolyahay maalintii. Dhammaan codsiyada waa in ay ansixiyaan Komishanka Beeraha Nasashada, Madadaalada & Biyo mareenka.
- Eeyadu waa inay ku xirnaadaan xarig mar kasta.
- Shahaadada Caymiska ayaa looga baahan yahay dhammaan dhacdooyinka.
- Kirooyinka ‘Port-a-let’ ayaa looga baahan yahay munaasabadaha ama isu imaatinka 50 ama ka badan ay ka soo qeybgalayso.
- Baabuur looma oggola in ay soo galaan beerta nasashada.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan boos ka qabsashada Battery Park, fadlan wac (802) 865-7247.

## Dhacdooyinka ka dhacaya City Hall Park

Kadib sanado badan oo dhisme ah, Park Hall City waa la cusboonaysiiyay waxayna diyaar u tahay inay mar kale isticmaalaan bulshadu! Iyada oo leh adeegyo kala duwan oo la cusboonaysiiyay, goobtani waxay ku habboon tahay munaasabadaha cabbirka yar iyo kuwa dhexdhedaadka ah, dhacdooyinka guud iyo kuwa gaar ahaaneedba.

## Adeegyada

- Hal musql oo dibadda ah, oo ay isticmaali karaan dadwaynaha
- Qalabyada ciyarta biyaha, oo ay isticmaali karaan dadweynuhu xilli kasta

- Miisaska iyo kuraasta bannaanka, oo ay isticmaali karaan dadweynuhu xilli kasta
- Korontada iyo intarneedka (kharash dheeri ah ayaa la bixiyaa)
- Isbaarada/ Istaajiyada Baaskiilada (kharash dheeri ah ayaa lagu dabaqayaa)
- Xirmooyinka maqalka ah (kharash dheeri ah ayaa la bixiyaa)
- Xirmooyinka Muuqaalada Fiidiyowga (kharash dheeri ah ayaa lagu dabaqayaa)

## Xeerarka & Qaanuunada

- Waa in uu jiraa 18 sano ama ka weyn si uu boos uga qabsado beerta nasashada.
- Dhawaaqa/sawaxanka sareeya ee gudaha beerta nasashada waa in aanu dhaafin 75 decibel waana in la sameeya keliya inta u dhaxaysa sacadaha 9 subaxnimo iyo 9pm. Waxa jira ugu badnaan 3 saacadood oo la ogolyahay maalintii. Dhammaan codsiyada waa in ay ansixiyaan Guddiga Beeraha Nasashoooyinka, Madadaalada & Biyo mareenka.
- Shahaadada Caymiska ayaa looga baahan yahay dhammaan dhacdooyinka.
- Meelaha la kireysto ee Portalet waxa laga yaabaa in loo baahdo dhacdooyin.
- Eeyadu waa inay ku xirnaadaan xarig mar kasta.

Su'aalo ama maclumaaad dheeraad ah oo ku saabsan kireysiga City Hall Park, fadlan iimayl ii soo dir [aclawson@burlingtoncityarts.org](mailto:aclawson@burlingtoncityarts.org).

## Dhacdooyinka lagu qabto Waterfront Park

Waterfront Park waa beer nasasho weyn oo goboleed oo ku taala galbeedka magaalada dhanka Lake Champlain Shoreline. Beertan nasashadi waxay hoy u tahay dhawr dhacdo oo waaweyn inta lagu guda jiro Gu'ga, Xagaaga iyo Dayrta, iyadoo [Burlington Bike Path](#) (Wadada Baaskillada ee Burlington) ay dhacayso xuduudkeeda dhanka bari. Wixii maclumaaad dheeraad ah oo ku saabsan qiimayaasha iyo nidaamka kireysiga Waterfront Park si loogu qabsado dhacdo dadweyne ama gaar ah, fadlan iimayl u dir [rbailey@burlingtonvt.gov](mailto:rbailey@burlingtonvt.gov).

## Dhacdooyinka Socodka & Orodka

Codsiyada dhacdada socodka/orodka ee 2022 hadda waa la aqbalayaa. Fadlan codsigaaga (hoos ku lifaaqan) ama su'aalaha iimayl ahaan ugu dir

[modaniel@burlingtonvt.gov](mailto:modaniel@burlingtonvt.gov). Codsiyada waxaa looga shaqeyn doonaa sida ay u soo kala horeeyaan. Fadlan ogow in \$50 oo ah kharashka codsiga la soo gudbiyo kahor inta aan codsigaaga dib eegis lagu samayn. Wixii su'aalo ah, fadlan wac (802) 865-7247.

[Riix halkan si aad u soo dejiso macluumaadka & codsiga](#)

## Burlington Greenway

Waddada 8-da mayl ee Burlington Greenway (Bike Path, Jidka Baaskiilada) wuxuu ku yaalaa xeebta harada Lake Champlain waana qayb ka mid ah 14 mayl ee Island Line Trail, kaas oo mideeya Burlington iyo Colchester Causeway, iyo Aagga Allen Point Access Area.

Jidka Greenway wuxuu ka bilaabmaa dhamaadka koonfureed ee Queen City Parkway wuxuuna ku fidsan yahay Colchester dhanka waqooyi ee marinka wabiga Winooski. Waxaa loogu talagalay safarka aan mootada ahayn oo keliya iyo ka sokow inay tahay meel madadaalo loo isticmaalo, sidoo kale waxaa loo adeegsadaa gaadiidka maadaama boqolaal rakaab ah ay maalin walba jidka isticmaalaan. Greenway wuxuu sidoo kale isku xiraa beero nasashooyin badan, keymo iyo xeebo dadwayne waana soo jiidasho dalxiis oo caan ah oo laga soo geli karo meelaha isku xirka ah ee badhtamaha magaalada waxaana doon ahaan loogaga imaan karaa dekdedda Burlington.

### Qiimaha

Burlington Bike Path (Jidka Baaskiilka ee Burlington) waxa kaliya loo isticmaali karaa dhacdooyinka gaarka ah ee ay ansixisay Waaxdu.

### Adeegyada

Burlington Greenway waxay dhex martaa Oakledge Park, Lakeside Park, Roundhouse Park, Perkins Pier, Waterfront Park, Waterfront Access North, Urban Reserve, North Beach, Arms Park, Leddy Park, iyo Starr Farm Park. Adeegyo badan ayaa laga helayaa gudaha beeraha nasashooyinka.

Xilli ahaan, waxaa jira tas-hiilaad musql ah oo ku yaala Oakledge, Waterfront Park, North Beach iyo Leddy Park.

### Xeerarka & Qaanuunada

- Waa inuu jiraa 18 sano ama ka weyn si uu u xafido Greenway.
- Baabuur looma oggola in ay soo galaan Greenway.

- Xaywaanada waxaa loo baahan yahay inay ku xirnaadaan xarig. Labo beer oo loogu talagalay eeyada ayaa ku yaala hareeraha wadada dhex marta Urban Reserve iyo Starr Farm.
- Xayawaannada looma oggola xeebaha dadweynaha.
- Fadlan u hoggaansan dhammaan taraafikada iyo isgoysyada waddooyinka.
- Wax codsi ah lama ogola ogolaansho la'aan.

Sii-qabsiga hoyga waxa lagu qeexaa Code of Ordinances (Xeerka Sharciyada ee the City of Burlington (Magaalada Burlington) Parks, Recreation and Waterfront Department (Xeerarka iyo Qaanuunada Waaxda Beeraha Nasashooyinka, Madadaalada, iyo Biyo-mareenka).

<http://www.burlingtonvt.gov/Attorney/Municipal-Code> .

**limayl ahaan noogu soo dir wixii su'aalo ah oo ku saabsan boos ka qabsashada Greenway.**

## Aroosyada Lagu Qabto Beeraha Nasashooyinka

Ma danaynaysaa inaad guurkaaga ku qabsato mid ka mid ah beerahayaga nasashooyinka ee quruxda badan? Halkaan waxaa ku qoran qaar ka mid ah macluumaadka guud ee kaa caawinaya inaad go'aan ka gaarto haddii xulashooyinka jira ay ku habboon yihiin baahiyahaaga:

- Xafladaha ay ka soo qeygalayaan 100 wax ka yar ee aan lahayn kaabayaal (sida kuraas, teendhooyin, iwm.) sawaxanka ama dhawaaqa aan la dheereynayn sida ku qoran qaab dhismeedka qiimaha Ogolaanshada Guud ee Beerta. Fadlan eeg qeybta **Park Permits (Ogolaanshaha Beerta Nasashada)** ee kore si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.
- Meel bannaanka ah (sida hoyga dalxiiska) waa in la kireysto si loo martigeliyo xaflad leh kaabayaasha, sawaxanak ama dhawaaqa dheer iyo/ama soo dhaweynta nooc kasta ha ahaatee. Fadlan eeg qeybta **Picnic Shelters (Hoy-yaasha Cunto Kuwada-cunista)** ee kore si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah. Tani ma khusayso haddii aad kiraysanayso Waterfront Park si aad ugu qabsato arooskaaga.
- Ogolaanshaha sawir-qaadista/fiidiyow looma baahna xilliga sawir-qaadista arooska/faraanta gelinta.

Hoos waxaa ku yaal liiska meelaha ugu caansan ee lagu qabto xafladaha aroosyada:

- Battery Park
- Ethan Allen Park:
  - Pinnacle-ka (ma jiro wax gaari ah oo gala meeshan - dhammaan ka qaybgalayaashu waa inay socod/baaskiil ku tagaan halkaas)
- Oakledge Park:
  - Blanchard Beach
  - Oakledge Cove
  - Treehouse (ogolaansho lagama bixiyo goobtan, laakiin waxa loo isticmaali karaa hadba sida loogu soo kala hormaro, waana in ay ahaataa mid furan oo ay isticmaali karaan dadweynaha mar kasta)
- Waterfront Park
- [Louisa Howard Chapel](#)

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka oggolaanshaha iyo boos qabsashada ama su'aalaha ku saabsan goobaha iyo taariikhaha la isticmaali karo, fadlan wac (802) 865-7247!

## **Garoomada Ciyaaraha**

Garoomada ciyaaraha ee la kiraysan karo waxay ku yaalaan beeraha nasashooyinka ee soo socda:

- Calahan Park: Garoonka Ciyaaraha ee Ujeedooyinka-badan Loo Istimmaalo, Garoomada Kubadda Koleyga/Softball-ka
- Leddy Park: Garoonka Ciyaaraha ee Ujeedooyinka Badan leh, Garoomada Kubadda Cagta ee Dadka Waaweyn & Garoomada Kubadda Cagta ee Dhallinyarada
- Starr Farm Park: Garoomada Ciyaaraha ee Ujeedooyinka Badan
- Roosevelt iyo Shiffilliti Park: Garoomada Kubadda Koleyga ee Dhallinyarada

## **Boos qabsi**

Fadlan wac (802) 865-7247 wixii la xiriira codsiyo ama su'aalo. Boos ka qabsiga garoomada wuxuu mudnaan lagu siinayaa hawlaha dugsiga iyo beeraha ee Burlington.

## **Adeegyada**

- Weelasha qashinka/dib u warshadaynta

- Qolalka musqulaha

## Xeerarka & Qaanuunada

- Da'da ugu yar ee lagu kiraysto garoonka ciyaaraha waa 18 jir.
- Dejibaajiga # Kaarka kiridhitka ayaa loo baahan karaa.
- Iisticmaalka garoomada ciyaaraha xilliga cimilada qoyan lama ogola.
- Lama ogola rinjiyeenta khadadka, calaamadaynta yoolalka, iwm.
- Codka/sawaxanka dheer lama ogola iyadoon la helin ogolaansho.
- Goobaha ciyaaraha fudud waa in loo isticmaalo ujeeddooyin madadaalo oo keliya.
- Ciyaar kasta oo leh in ka badan 20 kaqeybgale oo si dabiici ah loo abaabulay waxay u baahan tahay kiro garoon oo rasmi ah.

Sii-qabsiga garoonka ciyaaraha waxa lagu qeexaa Code of Ordinances of the City of Burlington, Rules and Regulations of the Burlington Parks, Recreation and Waterfront Department (Xeerka Sharciyada ee Magaalada Burlington, Xeerarka iyo Qaanuunka Waaxda Beeraha Nasashooyinka, Madadaalada, iyo Biyo-mareenka ee Burlington) <http://www.burlingtonvt.gov/Attorney/Municipal-Code> .

## Xarunta Bulshada & Madadaalada ee Miller (Miller Community & Recreation Center)

Miller Center, oo si ku habboon ugu taala albaabka xiga ee Hunt Middle School iyo CP Smith Elementary School ee Burlington ee cidhifka cusub ee waqooyi waxay bixisaa boos loogu talagalay hawlo kala duwan oo ay ka mid yihiin:

- **Jiim-naastikada** – garoonka kubada koleyga dugsiyada sare oo 7,000 oo fiit oo laba jibaaran ah oo leh sagxadda farsamaysan, oo leh fadhi ilaa 70 gaaraya, sabuuradaha elektiroonigga ah ee lagu qoro goolasha, goolasha kubbadda kolayga oo dib loo rogi karo, qaybiye jimicsi iyo qolal xirma oo leh musqulo, qubaysyo iyo sanduuqyo.
- **Qolka Bulshada** – dhul bannaan oo 1,800 fiit oo laba jibbaaran ah, borojektar iyo shaashad leh, dhawaaqa ku wareegsan, miisaska iyo kuraasta, fadhiisan karta ilaa 120. Waxaa ku jira jiko yar oo loogu talagalay diyaarinta iyo karinta cuntooyinka waxaana loogu talagalay cunto-kariyeyaasha.
- **Qolka Carruurta** – Ku fiican xafladaha dhalashada iyo kooxaha ciyaarta iyo sidoo kale shirarka yaryar, qolkani wuxuu leeyahay meel alaabta lagu mayro iyo miis, alaabta carruurtu ku ciyaarto, kabadaha iyo miisaska iyo kuraasta carruurta. Maktabadeena Fletcher Free Library “Maktabada yar” waxay sidoo

kale ku dhex taalaa qolka carruurta – xor u noqo inaad buug ka soo amaahato markaad booqato! Fadhiisan karta ilaa 25.

- **Goobta Jirdhisqa** – Wuxuu ku yaalaa meel ka baxsan qolka jimicsiga, qolka jimicsiga ee 1,100 fiit ee laba jibbaaran ah wuxuu leeyahay sagxad alwaax ah, muraayadaha gidaarka, qalabka muusiga iyo iftiinka dabiiciga ah, tirade dadka ee geli kara ayaa ku kala duwan hawsha.
- **Qolka Artiska/Fanka** – Sidoo kale wuxuu ku yaalaa agagaarka qolka jimicsiga, fasalkan wuxuu leeyahay miisas, meesha alaabta lagu dhaqo, iyo kuraas ilaa 30 ah.
- **Qolka Shirarka** – wuxuu ku yaalaa bannaanka hoolka oo leh meel deggan, meel raaxo leh oo dadwaynaha ay ugu isticmaali karaan SI BILAASH ah shirarka, iwm, fadhiisan karta ilaa 12, BILAASH AH

Boos qabsashadA waxay ku xiran tahay siyaasadda kansal gareynta laba toddobaad ah. Boos qabsiga lagu kansal gareeyo ogaysiis ka yar 14 maalmood waxa lagu dalaci doonaa qimo buuxa marka laga reebo haddii uu qof kale u kiraysto isticmaal kale. Bixinta khidmadaha kirada ayaa dhammaan doona wakhtiga jadwalka boos celinta, marka laga reebo haddii ay wax kale ku heshiiyaan shaqaalaha Miller.

**limayl noo soo dir si aan boos kaaga qabano Miller Recreation Center.**

## **Garoonka Leddy Ice**

Goobaha barafka ayaa diyaar u ah in loo kiraysto dhacdooyinka iskaytka. Wuxaan sidoo kale haynaa qolka nasashada oo loo isticmaali karo munaasabadaha sida xafladaha dhalashada oo ay ku jiraan isticmaalka garoon cabbirkiisu yahay kuwa Olombikada.

**limayl noo soo dir si aan boos kaaga qabano Leddy Ice Arena.**

## **CORE (Center of Recreation & Education at the ONE Community Center) (Xarunta Madadaalada & Waxbarashada ee ku yaala Xarunta Bulshada ee ONE)**

Waxay ku taalaa 20 Allen Street ee Old North End, BPRW waxay maamushaa dabaqa labaad ee ONE Community Center. Wuxaan leenahay dhowr fasal, qolal bulsho iyo qolka jimicsiga oo diyaar u ah in la kiraysto. Fadlan wac (802) 865-7088 wixii macluumaad dheeraad ah.

## **Schmanska Barn**

Waxay ku taalaa qeybta Dambe ee Bariga Burlington waana la kiraysan karaa, kuna taala Schmanska Park! Goobtani waxay ku habboon tahay dhinacyada yaryar ee gaarka loo leeyahay, shirarka bulshada ama shirarka ganacsiga. Schmanska Barn waxay diyaar u tahay in la kireeyo sanadka oo dhan, waxayna qaadaa 60 qof Gu'ga, Xagaaga iyo Dayrta hore iyo 30 qof xilliga Jiilaalka. Goobtani waxay u baahan tahay dhammaan kiraystayaasha inay furaan, nadiifiyaan oo ay iska xiraan markay dhamaystaan. Galitaanka Barn-ka oo ay la socoto tilmaamaha furitaanka ayaa lagu siin doonaa 48 saacadood gudahooda laga bilaabo markaad kireysato waxaana jira foomka "Habraaca Xiritaanka" oo aad buuxinayso gabii ahaanba dhamaadka isticmaalkaaga. Barn-ka waxaa laga eegi doonaa nadaafadda iyo wixii waxyeello ah kiro kasta kadib.

Su'aalaha la xiriira kirada, fadlan iimayl ugu dir [modaniel@burlingtonvt.gov](mailto:modaniel@burlingtonvt.gov)

### Adeegyada

- Qolka musquusha
- Korontada
- 10 miis (oo cabbirro kala duwan leh)
- 30 Kuraasta laablaabanta ah
- Meel kuleyl ah xilliga Qaboobaha
- Alaabta Nadiifinta
- Istimcaalka aagga cawska leh ee sida tooska ah uga soo hor jeedda Barn-ka

### Xeerarka & Qaanuunada

- Waa inuu jiraa 18 sano ama ka weyn si uu u kiraysto maqsinka.
- Waa in la raaco habraaca furitaanka & xiritaanka/nadiifinta.
- Waa inuu bixiyaa kharashka boos qabsiga wakhtiga ballan qabsashada.
- Kiraystaha ayaa mas'uul ka ah waxyeello kasta oo soo gaarta xarunta inta lagu jiro isticmaalkooda/boos-qabsigooda.